Nolol dhijitaal ah



Tusmada

Bilaabida bogga 3

Qalabka Caaqilka ee Sida Fudud Lacagta Loogu Bixiyo (Smart Pay as You Go) – qalabka muhiimka ah bogga 4,5

Muujiyayaasha guriga dhexdiisa bogga 6,7

Talooyin dhanka Korontada ah – kaydinta lacagtaada iyo badbaadinta adduunkeena bogga 8-11

Sawir Koodkan QR oo soo dejiso abkeena cusub ee hormarsan.

Abku waxa uu ka kooban yahay macluumaad badan oo faa'iido leh wuxuuna caawimaad iyo taageero kaa siinayaa mitirkaaga **ismaartiga ah**.

Runtii aad ayaan ugu faraxsannahay inaad dooratay qalabka **ismaartiga ah** waxaanna rajaynaynaa inaad ku raaxaysato inaad gacanta ku hayso korontadaada.

Ku soo dhawoow mitirkaaga cusub ee ismaartiga ah

Qalabkan yar ee waxtarka leh ayaa si toos ah ula hadlaya mitirkaaga **ismaartiga ah** isagoo ku siinaya xog joogto ah oo ku saabsan korontada aad isticmaalayso iyo qiimaheeda.*

Waxaad xitaa dajin kartaa miisaaniyad muujiyaha gurigaaga yaalana wuxuu kuu sheegi doona inay wax si fiican u socdaan iyo in kale

Waa kuwan sida loo ilaaliyo muujiyahaag guriga dhexdiisa yaala



Khadka miyaa go'ay?

- U soo guuri muujiyahaaga meel u dhow mitirka.



Korontada miyaa go'day?

- Muujiyahaaga haku tallaalnaado korontada. Qalabkaagu wuxuu u baahan yahay in koronto lagu tallaalo si uu u shaqeeyo.



Ma u baahan yahay in dib loo dajiyo?

Dhammaan qalabka farsamada mararka qaarkood waxay joojiyaan shaqada waxayna u baahan yihiin farsamo yar. Dami, ka saar korontada, ka saar baytariyada – sug hal daqiiqo - ka dibna dib u daar. Fadlan la soco waxay qaadan kartaa ilaa 24 saacadood in macluumaadka isticmaalkaagu soo baxo.

Weli cillad miyaa haysata?

Fiiri websaaydkeena si aad u hesho talooyin badan oo cillad baaris ah **edfenergy.com/smart-meters/using-a-smart-meter**

Doorashadaada.....

Mitirkaaga cusub ee **ismaartiga ah**wuxuu leeyahay laba nooc waxaadna samayn doontaa doorashadaada markaad ballansanayso:

- Smart Pay as You Go (mid aad mitirkaaga lacag kaga shubanayso taleefankaaga ama dukaanka)
- Nooca Smart credit oo aad ku sii wadayso bixinta biilasha tusaale ahaan lacag bixin toos ah

Labada bog ee soo socda ayaa loogu talagalay kaliya macaamiisha qalabka smart pay as you go. Haddii aad tahay macmiil smart credit isticmaala fadlan si toos ah u aad bogga 6

* Macluumaadkaaga korontada waxaa la cusboonaysiiyaa 30 ilbiriqsi kasta macluumaadka gaaskaagana qiyaastii 30 daqiiqo kasta.

Ku soo dhawoow Smart ‘Pay as you Go’!

Aad ayaan ugu faraxsanahay inaad ka mid tahay.

Waxaan kuu soo diri doonnaa iimayl ama qoraal ayaan kuu soo diri doonnaa labada maalmood ee soo socda si aan kuu ogeysiino marka akoonkaaga cusub diyaar yahay. Markaa waa waqtigii Lacag Lagu Shubi lahaa. Ha welwelin adeeggaaga wuu soo jiri doonaa inta aan dajineyno akoonkaaga.

Lacag hore miyaa ku jirta mitirkaagi hore? Si toos ah ayaan u wareejin doonaa, badanaa 48 saacadood gudahood. Marmar waxay qaadan kartaa illaa 10 maalmood. Sidoo kale waan ku ogeysiin doonnaa marka la dhammeeyo.

Lacag ku shubidda

Adigoo isticmaalaya EDF App ama MyAccount ee qalabkaaga waxaad awoodaa inaad:

- Aragto haraagaaga aadna ku shubato lacag
- Keydiso faahfaahinta kaarkaaga si ay kuugu fududaato lacag bixinta
- Deji lacag ku shubid otomaatiig ah iyo ogeysiin marka haraagaagu yaraado

Way fududahay – si fudud uga soo dejiso barnaamijka EDF App Store ama Google Play. Ama gal edfenergy.com/myaccoun adigoo isticmaalaya lambarkaaga koontada cusub. Wali ma diiwaangashanid miyaa? Waxay qaadataa dhowr daqiiqo oo kaliya.

Siyaabo kale oo lacag loogu shubto
Adigoo wacaya khadka taleefanka ee otomaatiga ah 0333 009 7111^ ama PayPoint kasta adoo isticmaalaya kaarkaaga Lacag Ku Shubidda ama kaliya Aqoonsigaaga Lacag Ku Shubidda

Inaad ku sii jirto khadka: Waxaan leenahay hab macaamiisha u fudud ee mitirkeena **ismaartiga ah**. Tani waxay asal ahaan ka dhigan tahay inaadan lumin doonin adeeg “saacadaha ka baxsan shaqada” ama illaa maalinta xigta ee shaqada. Waxaad dib u bixin doontaa tan marka xigta ee aad lacag ku shubanayso mitirkaaga.

Sida deyntaada loo isticmaalo: Waxay bixisaa korontada aad isticmaashid, kharashyada taagan ee maalinlaha ah iyo dib u bixinta deynta

Ma baxaysaa? Hubi in ay ku jirto lacag ku filan oo aad ku ilaalin karto qalabkaaga (sida qaboojiyahaaga). Ama soo deji abkeena si aad meel kasta uga shubato. Ama ku shubo intaadan bixin.

Biil dambe ma jiro: Biil dambe ma heli doontid, laakiin waxaad taariikhda ku shubashadaada ka arki kartaa adigoo isticmaalaya MyAccount.

Haddii aan lacag kugu leenahay: Waxaad isticmaali kartaa lacag bixinta fudud inaad dib u bixiso wax kasta oo deyn ah. Waxaan ka dhignay lacag bixintaada muddo iyo qiimo aad awoodid, oo aan dulsaar lahayn.

Ma u baahan tahay caawimaad dheeraad ah? Gal onlaaynka edfenergy.com/payg halkaas oo aad ka heli doonto taageero badan oo ay ku jiraan fiidyowyo iyo Su’aalaha Soo Noq-noqda

^ Wicitaanada lambarada UK waxaa ku jira qorshe kasta oo wicitaan oo guud oo aad yeelan karto. Haddii aadan haysan qorshe wicitaan oo guud, wicitaannada waxaa lagu dalacayaa qiimaha gudaha. Fadlan ka hubi adeeg bixiyahaaga haddii aadan hubin

Smart ‘Pay as You Go’ adoo isticmaalaya muujiyaha gurigaaga yaala

Muujiyahaaga guriga yaala ayaa ku tusi doona haraaga deyntaada ee shaashadda guriga. Haraaga korontada waxaa la cusboonaysiiyaa dhowr ilbiriqsi kasta, mitirkaaga gaaskana 30kii daqiiqoba mar






Ogeysiiska haraaga yar

Muujiyahaaga guriga yaala wuxuu fariin digniin ah ka muujin doonaa shaashadda gurigaaga.

Ma u baahan tahay deyn degdeg ah? Tan waxa lagu kaydiyaa mitirkaaga haddii aadan lacag ku shuban karin sabab kastaba ha keentee. Waxaad dib u bixin doontaa tan marka xigta ee aad lacag ku shubanayso. Waxaad adeegaan ka shaqaysiin kartaa marka haraaga deyntaada tahay £1 ama ka yar. Waxaad deynta xaaladda degdega ah ka heli kartaa (£10 ku shubid kasta) qeyb ku taal muujiyahaaga guriga yaal

Lacag ku shubidda miyaanan shaqayn? Haddii deynta aysan gaarin mitirkaaga korantada waxaad gacan ahaan ugu dari kartaa muujiyahaaga guriga yaala adigoo isticmaalaya Lambarka Tixraaca Macaamilka ee Gaarka ah (Unique Transaction Reference Number, UTRN) ee 20 lambar ah Waxaad ka heli kartaa lambarkan rasiidkaaga ku shubashada, fariinta xaqiijinta ama MyAccount oo hoos timaada Top Up History (Ku Shubashooyinkii Hore).

Shaashada GEO IHD



Shaashadda Chameleon IHD



Mitirada gaaska gal edfenergy.com/myutrn si aad u aragto sida si toos ah UTRN-kaaga u galin lahayd mitirkaaga

Korontada miyaa go’day? Waxaad u baahan doontaa inaad marka hore lacag ku shubto ka dibna dooro “Activate Supply” (Ka Shaqeysii Adeegga) ama “Enable supply” (Oggolow adeegga) ee ku jira muujiyahaaga guriga yaala si aad dib ugu heshid adeegga korontada

Si aad dib ugu heshid gaaska mitirkaaga gal **edfenergy.com/payg** halkaas oo aad ka heli doonto Su’aalo iyo Jawaabo waxtar leh

Muujiyahaaga guriga ee Geo Trio II



1 Awoodda anteenada

Wuxuu muujiyaa haddii muujiyahaaga uu u dhowyahay mitirkaaga.

2 Energy now (Tamarta hadda)

Shaashada Energy now waxay u qaybsan tahay kala bar, iyadoo dhinaca bidix ay ku saabsan tahay isticmaalka korontada iyo midigta oo ku saabsan gaaska.

Kaliya noocyada tamarta ee jira ayaa la tusi doonaa - ololka gaaska lama tusi doono haddii aadan haysan mitir gaas ee caaqil ah, tusaale ahaan.

3 Energy today (Tamarta maanta)

Ka eeg waxa aad kharashgaraysay maanta, haddii aad dejisay miisaaniyad ka arag sida ay arrintan uga soo horjeedo.

Waxay saadaalin doontaa, iyadoo lagu saleynayo isticmaalkaaga isla maalintaas ee usbuucii hore, haddii aad ku jiri doonto miisaaniyada maalintaas. Goobabada bannaanka ayaa buuxsamaysa markaad isticmaalayso tamar, taasoo ku ogeysiinaysa haddii aad ku dhowdahay ama aad ka badan tahay miisaaniyadda

4 Bandhiga qiimaha

Wuxuu muujiyaa kharashyadaada. Isticmaal badhanka 'Selection' (Xulashada) si aad u bedesho inta u dhaxaysa £/saacaddii (sida caadiga ah) ama cabirka tamarta.

5 Qeybta kontoroolka

Isticmaal tan si aad uga dhex maamusho muujiyahaaga guriga.

6 Nalka taraafikada

Waxay ku tusinaysaa inta koronto ee aad isticmaalayso hadda. Cagaarka waa si wanaagsan Oranjaha macnaheedu waa inaad wax yar kor u kacday. Casaanka waxay ka dhigan tahay in la gaaray waqtigii wax la damin lahaa!

Muujiyahaaga guriga ee Chameleon 3



1 Awoodda anteenada

Wuxuu muujiyaa haddii muujiyahaaga uu u dhowyahay mitirkaaga.

2 Batari

Xusuusnow inaad galiso muujiyahaaga guriga oo aadna dabeyso. Waxaa jira laba calaamadood oo batari ah. Mid wuxuu muujinayaa 'batteri hooseeya', kan kalena wuxuu muujinayaa in 'dabka ku socdo' iyo in kale. Waa inaysan isku mar soo bixin.

3 Calaamadda miisaaniyadda

Waxay muujinaysaa ugu badnaan inta aad rabto in aad isticmaasho maalin kasta.

4 Cost display (Bandhiga qiimaha)

Wuxuu muujiyaa kharashyadaada. Isticmaal furayaash fallaarta ee ku jira qeybta kantaroolka si aad dib ugu rogto kharashyada maalmihii hore. Isticmaalka (Kiilowaatka) ayaa laga arkaa shaashadda hoose. Tani way isweydaari doontaa markaad fiirinayso inta tamar ee aad isticmaalayso.

5 Qeybta miisaaniyada

Ka eeg inta miisaaniyad maalmeedka ah ee aad isticmaashay.

6 Muuqaalka shidaalka

Ka eeg isticmaalkaaga korontada, isticmaalka gaaska – ama labadaba.

7 Qeybta kontoroolka

U isticmaal tan si aad u maamusho muujiyaha gurigaaga.

8 Nalka taraafikada

Waxay ku tusinaysaa inta koronto ee aad isticmaalayso hadda. Cagaarka waa si wanaagsan Oranjaha macnaheedu waa inaad wax yar kor u kacday. Casaanka waxay ka dhigan tahay in la gaaray waqtigii wax la damin lahaa! Xasuusnoow, muujiyaha gurigaaga wuxuu qaadanayaa dhowr maalmood si uu u barto waxa adiga kugu caadi ah – markaa isha ku hay waxa uu nalka taraafikada kuu sheegayo toddobaadyada soo socda.

Si caqliyeysan u keydi

Waxaad kaydsan kartaa ilaa £300 sanadkii adigoo raacaya talooyinkan degdega ah oo fudud. Waxa ugu wanagsan, waa bilaash.

Isku qor EnergyHub iyada oo loo marayo MyAccount si aad u aragto sida saxda ah ee aad u isticmaalayso tamartaada iyo si aad u hesho talooyin aad lacag ku kaydsanayso

£95

Ku qaado hal daqiiqo wax ka yar qubeyska kuna dar madaxa shaawarka oo hawo bixinaya

£30

Suxuuntaada ku dhaq weel intii aad ku hoos dhaqi lahayd tuubada socota

£5

Kaliya isticmaal qasaaladda marka aad haysato dhar buuxinaya oo ku dhaq 30°

£30

Isticmaal weelka qalajiyaha halkii aad ka isticmaali lahayd mashiinka qalajiyaha



£13

Dami nalalkaaga markaad qolka ka baxayso

Xir daahyadaada habeenkii oo iska ilaali in aad dharkaaga dul saarto kuleyliyaha

£80

Hoos u dhig heerkul cabirahaaga hal darajo

£30

Ha kaga tagin qalabka korantada iyo jaajarada iyagoo daaran

Qiyaasta keydinta sannadlaha ah waxay ka imaanaysaa websaaydka Energy Savings Trust. Waxay ku saleysan tahay guri qoys oo ka kooban seddex qol-jiif. Haddii aad jeclaan lahayd inaad wax dheeri ah ka ogaato, booqo energysavingtrust.org.uk.

Deegaan caaqil ah

Haddii qof kasta oo dalka ku nool uu helo mitir caaqil ah, waxaan badbaadin karnaa tamar nagu filan si aan koronto u siino guri kasta oo ku yaal Manchester, Cardiff iyo Aberdeen sannad dhan. Marka waad ku mahadsan tahay inta aad dadaashay.

Caawinta tallaabooyinka keydinta tamarta

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto deeq si ay kaaga caawiso inaad ku rakibto cabbirada koronto dhaqaaleyska ah gurigaaga. Booqo edfenergy.com/smartheating si aad u hesho talo ku saabsan dahaarka iyo beddelka kuleyliyaha kaarboonka yar.

£200

Rakibo kuleyliye koronto dhaqaaleys ah oo cusub

£145

Dahaarka gudaha derbiga wuxuu keydin karaa illaa 640kg oo kaarboon ah

Qalabyada tamarta dhaqaaleeya ee A+++ waxay badbaadin karaan ilaa 580kg oo kaarboon ah inta ay jiraan

Beddelka kuleyliyaha tayada sare leh sida diinimooyinka kuleylka waxay keydin karaan illaa 2 tan oo kaarboon ah

U guuridda kuleyliyeyaasha kaydinta ee caqliga leh waxay keydin kartaa ilaa 390£ sanadkii*

*https://www.dimplex.co.uk/sites/default/files/Running_Cost_Report_2014.pdf



£130

Dabool saqafka hoostiis oo kaydi ilaa 50kg oo kaarboon ah

£110

Rakibo daaqada labada muraayad leh ee A-lagu qiimeeyey

£75

Ku beddel tubooyinka kuleyliyhaaga kuwo heerkulbeege ah

£35

Isticmaal nalalka LED-ka ama nalalka tamarta keydiya

Qiyaasta keydinta sannadlaha ah waxay ka imaanaysaa websaaydka Energy Savings Trust. Waxay ku saleysan tahay guri qoys oo ka kooban seddex qol-jiif. Haddii aad jeclaan lahayd inaad wax dheeri ah ka ogaato, booqo energysavingtrust.org.uk.

https://energysavingtrust.org.uk/advice/air-source-heat-pumps/ - waxay ku saleysan tahay guri ka kooban 4 qol

Way fiican tahay in la ogaado in taageero dheeraad ah la heli karo

Adeegyada Mudnaanta leh

Micno ma lahan sida aan wanaagsannahay – had iyo jeer waxaan dhammaanteen u baahanahay xoogaa gargaar dheeri ah. Halkan EDF, waxaan rabnaa inaan hubino inaad ogtahay meesha aad ka heli karto. Marka haddii aad ka welwelsan tahay biilasha ama maaraynta dhaqaalahaaga, aad u baahan tahay inaad ku hesho macluumaadkaaga far waaweyn, CD ama farta indhoolaha, ama aad rabto inaad hubiso inaadan ka maqnaan wax faa'iidooyin ah, waxaan halkan u joognaa inaan ku caawino.

Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan Adeegyadeena Mudnaanta leh iyo si aad isu diiwaangeliso booqo **edfenergy.com/ps** ama naga soo wac **0800 269 450** (minicom **0800 096 2929**). Khadadka waxay furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha 8 subaxnimo illaa 8 fiidnimo iyo Sabtida 8 subaxnimo illaa 2 duhurnimo.

Caawinaad madax banaan oo ka timaada Citizens Advice

Waxaan kaloo la shaqaynaynaa Citizens Advice Plymouth si aan macaamiisheena dalka oo dhan u siino talo madax banaan oo ku saabsan maaraynta lacagtooda. Waxaad ka wici kartaa 0808 223 1133, ama 0300 330 0519 adigoo adeegsanaya taleefanka gacanta.

Akhrinta mitirkaagii hore – macluumaad ahaan keliya:

	Faahfaahinta Mitirka Korontada	Faahfaahinta Meterka Gaaska
MPAN / MPRN		
Heerka 1		
Heerka 2		
Heerka 3		
Heerka 4		
Haraaga Amaahda:		
Haraaga deynta:		

Waxaan talo ka helay oo kaarna i tusay farsmo yaqaankayga, isagoo igula taliyay inaan damiyo dhammaan qalabka xasaasiga ah. Haa (fadlan sax)	

Saxiixa Macmiilka:	Taariikh:

Smart Energy GB waa urur madax banaan oo ay samaysay dawladda si uu u wado ololaha qaran ee soo saarista mitirada **ismaartiga ah**. Waxay la shaqaynaysaa shirkadaha tamarta, oo ay ku jirto EDF, si loo hubiyo in qof walba uu heli karo macluumaadka ay uga baahan yihiin mitirka **ismaartiga ah**. Gal smartenergyGB.org si aad wax badan u ogaato.

EDF Energy waa magac ganacsi oo ay isticmaasho EDF Energy Customers Ltd, Lambarka Diiwaangalinta 02228297 oo Xafiiskiisu ku yaal 90 Whitfield Street, London, W1T 4EZ, oo ku shirkoobay England iyo Wales.

R1201.11.21.V8